

Barnaamijka Dhammeystiran ee Cilmi-Nafsiga PPS Waxaa La Siiyey Muhiim ah oo Dhan \$ 5.5 Milyan Si Kor Loogu Qaado

Barnaamijka Cilmi-nafsiga dhammeystiran ee Dugsiyada Dadweynaha Portland waxaa dhawaan loo magacaabay in la siiyo deeq lacageed oo dhan \$ 5.5 milyan taasi oo ay ugu deeqday Waaxda Waxbarashada Maraykan, ka dib markii ay xaqiijiyeen horumarinta fayyo-qabka ardayda iyo waxqabadka waxbarasho.

Deeqdani lacageed ee dib loo cusbooneysiisay waxaa loo isticmaali doonaa in lagu bixiyo addeegyada 18 Title I cilmi-nafsiga caafimaadka maskaxda(dhimirka) oo ku salaysan dugsiyada degmada dhammaantood sanad-dugsiyeedka 2024-2025. Tani waxay ka badan tahay 11 dugsi oo sanadkii la soo dhaafay la siiyey addeegyadda. Inta lagu gudo jiro mudadda deeqdan, waxaa la qorsheeyey 25 dugsi Title I xilliga abbaalmarinta deeqda waxay heli doonaan dugsiyadu addeeyo cilmi-nafsiga ah oo dhammeystiran.

Marka la eego Cynthia Velásquez, Maamulka Barnaamijka Dhammeystiran ee Cilmi-Nafisiga Dugsiyada PPS, deeqdani lacageed waxay dammaanad qaadaysaa in kumanaan arday ahi ay heli doonaan gargaarka ay u baahan yihiin sidii ay horumi lahaayeen, haddii ay noqon lahayd fasalka gudhiisa ama bannaankiisa labadaba.

“Deeqdani waxay macnaheedu tahay in dugsiyadeenu ay sii wadi doonaan sidii ay u sii horumarin lahaayeen inay bixiyaan addeeyo noocan ah oo dhammeystiran iyo nidaamyo ka kooban dhowr heer ay ku taageerayaan dugsiyada xirfadlayaal ku takhasusay cilmi nafsiga,” ayey tidhi.

Xirfadlayaasha Cilmi-nafsiga dugsiyadu ee dhammeystirani waxay kaalin mug leh ka qaataan dugsiyadeena. Kaliya maaha kuwa in loo tababaray inay bixiyaan addeeyo qof qof ah, kuwo ku salaysan qoys, iyo caafimaadka dhimirka koox ballaaran, laakiin waxay sidoo kale taageeraan ardayda waxbarashada gaarka ah iyo dadaaladda barashada shucuurta-bulshada iyaga oo u addeegaya sidii la-taliyaasha waxbarashada iyo horyaaladda sinnaanta jinsiga iyo barnaamijyada cadaaladda bulshada.

Sanadkii la soo dhaafay oo kaliya, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxaa ka qeybqaatay sidii wax looga qaban lahaa inta aanay xaaladu xumaan ka hor in ka badan 7,700 barnaamijka cilmi-nafisiga oo dhammeystiran, boqolkiiba 90.4 ardayda ka qeybqaatay waxay ahaayeen ardayda taariikh ahaan helin gargaarkii ay u baahnaayeen. Waxay si guud ahaan waxa ka qabtaan maalin kasta taasi oo ka dhigta xubnaha kuwa qiimo ku leh dugsiyada degmadeena iyo bulshooyinka dugsiyada.

“Qoto dheerida iyo sida uu u ballaaran yahay tababaradayadu waxay ka dhigan tahay inaan ka gun gaadhno wax walba laga bilaabo taageerida xiisadda ka hortaga isdhaafinta nafta(is-dilka) guud ahaan dugsiyada iyo waxbarashada iyo kala duwanaanshaha, sinnaanta, iyo ka mid noqoshada shaqada,” ayey tidhi Kristin Irwin, oo ah xirfadlaha Cilmi-nafsiga Dugsiga Sida Gaarka Loogu Soo Meeleyey.

“Caafimaadkeena dhimirkeena, waxbarashadeena, iyo qeybaheena waxbarashada gaarka ah ee aan ku soo kordhinay ayaa ka dhiga mid cajaan ah sidoo kalena muhiim ah.”

Si kastaba ha ahaatee sii wadista in la maalgaliyo shaqadani muhiimka ahi, deeqdan lacageed waxay sidoo kale wax laga qaban baahiyaha ardayda Madowga ah, kuwa Dhaladka ah ee loo yaqaano(Native), iyo ardayda baranaya Luqada Ingiriisida, gaar ahaan iyada oo marka shaqaalaha la shaqaaleysiinayo loo eegi doono jinsi ahaa, meesha ay ka soo jeedaan, dhaqan ahaan, iyo kala duwanaanshaha luqadaha ardayda addeegyada la siinayo. Iyo in lacagta loo isticmaali doono sidii loo ballaarin lahaa Daaweynta Shucuurta iyo Horumarinta sidii ay bulshada ula xidhiidhi lahaayeen ardayda dugsiyada dhexe Title 1. Daaweyntani waxay muujisay mid waxtar weyn u leh caawinta dhallinyaradda inay la qabsadaan xaaladaha adag iyo shucuurtooda.

Elaine Hidalgo, oo ah Xirfadle u qaabilsan Cilmi-Nafsiga Dugsiyada Dadweynaha Portland ee addeegyada Ardayda ay Kala Duwan Yihiin Dhaqankooda iyo Luqadahoodu, ayaa tidhi u nuglaanshaha iyo u dhibirsanaanta ayaa ah tiir dhexaad u ah guusha koosatay barnaamijka cilmi-nafsiga dugsiyada, iyo in iyada iyo asxaabteedu ay qaateen dariiqa ah mid loo dhibirsanaanayo oo ay ka soo dheegtaan xogta ay hayaan.

“Shaqadeena ayaa keenta waayo-aragnimadeena, iyada oo la sameynayo meelo ay dadku dareemaan marka ay ku sugan yihiin inay nabdoon yihiin iyo inay ku dhiiran karaan sidii ay ula wadaagi lahaayeen aragtidooda iyo inay xaqiijiyaan in dhammaan dadka kale duwan ee kala yimi jinsiyada kala gedisan ay noqdaan kuwa muuqda oo la dhageysto.”